

## Trafikskadenämnden

# Baaritaanka guddiga dhaawacyada gaadiidka

Haddii adiga ama xigtadaadu aad gaadiid ku dhaawacantaan Guddiga dhaawacyada gaadiidka ayaa baari kara magdhawga ay shirkadda ceymisku idinku siisay dhaawacyada qof ahaaneed. Maareynta kiiska ee guddigu waxay ku dhaceysaa luqadda Iswiidhishka. Baaritaanku waa lacag la'aan. Ra'yiga guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu tala bixin u yahay shirkadda ceymiska. Guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu baaritaan ku sameeyaa laba nooc oo kiisas ah; kiisas waajib ah iyo kiisas murun xallin ah. Waraaqahan warbixintu waxay ka hadlayaan kiisaska waajibka ah.

### Kiisaska waajibka ah

Shirkaddaada ceymisku waxay mararka qaarkood kiiskaaga u diri kartaa Guddiga dhaawacyada gaadiidka si loo baaro. Waxay taasi tusale ahaan khuseeyay haddii cuuryaannimada dawada la xiriirta ay tahay ugu yaraan boqolkiiba tobant. Baaritaanka waa la sameynayaa iyadoon taas loo eegeyn in aad adiga iyo shirkaddaada ceymisku aad heshiis ku tihin iyo in kale.

Haddii cidda kiiskaaga meereysay ay tahay Ururka ceymiska gaadiidku (TFF) waa in TFF-tu ay mararka sidoo kale u dirtaa kiiskaaga Guddiga dhaawacyada gaadiidka si ay u baaraan.

Marka kiiskaagu uu yahay mid waajib ah ma geli kartid oo kiiskaaga si digital ah ulama socon kartid.

Waxaa kiiskaaga baaraya shirkaddaada ceymiska, waxayna ka diyaarineysaa qoraal loogu tala galay guddiga. Waxaa qoraalka ku jira hindisaha shirkadda ee magdhawga, sida aad hindisaha u aragtid (mawqifkaaga) iyo dukumiintiyo micno u leh baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidka. Shirkadda ceymisku adiga ayey kuu soo direysaa qoraalka loogu tala galay guddiga inta aysan annaga kiiska noo soo dirin.

### Aniga naftirkeygu codsi ma u diran karaa Guddiga dhaawacyada gaadiidka si loo baaro kiiskeyga?

Haddii uu kiiskaagu yahay mid waajib ah codsi uma dirsan kartid adigu Guddiga dhaawaca gaadiidka.

### Sidee buu baaritaanku ud hacayaa?

1. Shirkaddaada ceymiska ayaa kiiskaaga u direysa Guddiga dhaawacyada gaadiidka.
2. Kiiskaaga waxaa lagu diiwaangelinayaa, laguna eegi doonaa shir. Dabadeed waxaa la soo qorayaa aragti ay ka muuqato wixii u soo baxay Guddiga dhaawacyada gaadiid.
3. Baaritaanka ka dib waxaa aragtida Guddiga dhaawacyada gaadiidka loo diraya shirkaddaada ceymsika.
4. Shirkaddaada ceymiska ayaa kuu soo direysa aragtidaas.

### Ilaa imisa ayuu qaadanayaa baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidku?

Waqtiga maareyntu wuxuu badanaa u dhexeeyaa seddax ilaa iyo lix bilood. Mararka qaarkood waa la dheereyn karaa inta gacanta lagu haynayo kiiska.

**Luqaddee bey waraaquhu ku qornaanayaan?**

Baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu ku dhacayaa af-lswiidhish.

**Marka laga hadlayo wakiil sharci ahaaneed?**

Waxaad yeelan kartaa wakiil ku caawiya inta uu socdo baaritaanka Guddiga dhaawacyada gaadiidku, laakin taasi maaha wax shardi ah. Haddii aad rabtid in aad wakiil heshid waxaa go'aan ka gaareysa shirkadda ceymiska haddii ceymiska gaadiidku uu kaa bixinayo kharashaadka wakiilka. Haddii kale adiga ayaa iska dhiibaya kharashka.

**Wax ma ka joogi karaa kulanka Guddiga dhaawacyada gaadiidka?**

Adiga ama wakiilkaagu wax waad ka joogi kartaan marka arrinkaaga la eegayo. Waxaa baaritaanka la sameynayaa iyadoo laga duulayo dukumiiniyada qoraalka ah oo keliya.

**Ma khasabbaa in ay shirkaddeydu ceymisku raacdo ra'yiga Guddiga dhaawacyada gaadiidka?**

Guddiga dhaawacyada gaadiidku wuxuu gudbinayaa aragtii qoraal ah oo tala bixin ah. In aragtidi ay tala bixin tahay waxay ka dhigantahay in ceymisku uusan u baahneyn in uu ra'yiga raacyo. Waa wax aan caadi ahayn in shirkadda ceymisku aysan raacin aragtida.

**Ma ka dacwoon karaa aragtida Guddiga dhaawacyada gaadiidka?**

Lagama dacwoon karo aragtida Guddiga dhaawacyada gaadiidka. Haddii aadan aragtida ku qanacsaneyn ama aysan shirkadda ceymisku u beddelin go'aankeeda si aragtida waafaqsan waxaad fursad u haysataa in aad u dacwootid maxkamad guud. Haddii ay sidaas noqoto waa go'aanka shiradda ceymiska waxa ay maxkamaddu eegeye so ee maaha aragtida guddiga. Waxaa la dabbaqi karaa xeerarka kiis xiridda. Wixi xog ah ee dheeraad ah marka laga hadlayo xaaladda noocaas ah waxaa habboon in aad kala xiriirtid shirkaddaada ceymiska.

**Wixii macluumaad ah ee dheeri ah waxaad ka heleysaa [www.trafikskadenamnden.se](http://www.trafikskadenamnden.se)**